

Ku soo dhowow oo la xiriir lataliye qaraabo (anhörigkonsulent)

Adigaas kaalmaynaya qof ka yar 65 sanno

Taleefan: 031-365 50 30

limayl:

anhorigstod.under.65@funktionsstod.goteborg.se

Adigaas kaalmaynaya qof ka weyn 65 sanno

Taleefan: 031-365 00 00, Göteborgs Stads

Kontaktcenter. Weydii lataliyaha qaraabada ee qaabilsan meesha aad adiga ama qofka ehelka kuu ah uu deggan yahay.

Waxaad warbixin dheeri ah iyo macluumaadka

xiriirka ka helaysaa goteborg.se/anhorigstodnaradig ama iskaan ka qaad koodka QR hoostan.



Xiriirkayga

Taageero la siiyo qaraabada

**Ma
caawisaa
qof?
Taageeridda
qaraabada ayaa
kuu jooga!**

Maa kaalisaa, caawisaa ama daryeeshaa qof kuu dhow?

Ma leedahay xigto, da' yar ama waayeel, oo xanuun, adeegsi maandooriye oo daran, balwad, naafannimo jirka ama dhimirka ah darteed u baahan kaalmadaada? Qofka kuu dhow wuxuu noqon karaa xubin qoyska ah, qaraabo, deris, ama saaxiib wanaagsan. Adigaas ehelka ah waxaad tahay muhiim, waxaad samaysaa dadaal muhiim ah oo mararka qaar adiga xitaa taageero ayaad u baahan tahay.

Dhanka qaraabada

Qaraabada rabta in ay kaaliso, caawiso ama daryeesho qof u dhow waa in la siiyo noocyo kale duwan oo kaalmo ah. Kaalmada waxaa loo qaabaynayaa si ay ugu fududayso qaraabada dhanka jirka, dhimirka ama isdhexgalka bulshada. Iyadoo laga duulayo hadafka howlaha waaxaha iyo kooxda loo dan leeyahay ayaa qaraabada loo qirayaa, xushmad lagula dhaqmayaa oo loo arkayaa qof lagu tiirsan yahay.

Shaqadeenna waxay ku tiirsan tahay xeerka sooshiyaalka, cutubka 13, baragaraafka 9:

"... ayaa la siinayaa kaalmo qofka daryeelaya qof u dhow oo ah waayeel ama mudda dheer xanuunsan iyo qofka kaalinaya ehel leh naafannimo"

Ma rabtaa inaad qof kala hadashid xaaladdaada?

Magaalada Göteborg waxaa jira lataliyayaasha qaraabada (anhörigkonsulent) oo qaraabada ka caawiya tusaale ahaan wadahal, khudbado, waxbarasho, kooxaha qaraabada ama uun ka caawiya in si sax ah wax loo helo.

Adiga qaraabada ah iyo qofka aad caawinaysid labadiinaba waxaad xaq u leedihiin inaad kaalmo ka dalbataan xoghaye sooshiyaal. Waxay noqon kartaa ka sii qabasho (avlösning) guriga ah, howl-maalmeed (dagverksamhet) ama kaalmo kale. Haddii aad u baahan tahay turjumaan noocuu doono ha ahaadee, waan kaa caawinaynaa in aan kuu qabanno.

